Cudurada iyo uurka

Ilaalinta dhallaankaaga

Buug-yarahaan wuxuu kuu macneynayaa qaar ka mid ah cudurada dhibaato u keeni karo dhallankaaga, laakin la daaweyn karo.
Waxay yihiin:

- Fayruska dhammeeya unugyada difaaca jirka (HIV);
- Cagarshoowga nooca B; iyo
- waraabow.

Waxaa dhammaan cuduradaan lagu ogaada tijaabada baarista, waxaana baaristaan kugu samayn doono umulisadaada.

Buug-yaraha wuxuu xittaa ku siin doonaa macluumaad ku saabsan iska ilaalinta jadeecada.

Waxaad xulan kartaa haddii aad rabtid iyo in kale in baaritaanyada lagugu sameeyo. Macluumaadka buugyarahaan wuxuu kugu caawin doonaa go'aan ka gaarista baaritaanka aad rabtid in lagugu sameeyo. Waxaad xittaa baaritaanyada oo dhan kala hadli kartaa umulisadaada iyo takhtarkaaga ka hor intii aad go'aan ka gaarin, iyo weydii hab-socodka baarista ee deegaanka.

Tiyaaboyinka baarista ee dhammaan cuduradaan waxaa ku taliyo Guddiga Baarista Qaranka – waa guddi takhasuusan ee loogu talagalay in lagu ogaado sida ay wax-tar u leeyihiin tijaaboyinka baarista iyo faa'iidoyinkooda.

Waa maxay sababta baaritaanyada loogu taliyo dadku uurka leh?

Tijaabada baarista HIV, cagaarshowga nooca B iyo waraabowga waxaa lagu taliya in la sameeyo uur walba. Haddii aad qabtid hal ka mid ah cuduradaan iyo lagaa daaweynin, ilmahaada ayuu ku dhici karaa intii uu uurka ku jiro, markuu dhalanaayo ama dhalashada ka dib.

Dhammaan cuduradaan aad ayeey u xumaan karaan iyo haddii la daweynin waxay wax-yeeleyn xun gaarsiin karaan ilmahaada. Badanaa dadka qabo cuduradaan ma xannuunsan doonaan iyo ma ogaan doonaan inay cuduradaan qabaan. Haddii aad qabtid hal ka mid ah cuduradaan, daaweynta wuxuu si buuxa u yareyn doonaa fursadda in ilmahaada ku dhaco cudurka.

Sidee baaritaanyada loo sameeyaa?

Tiyaabada baarista ee HIV, cagaarshowga nooca B, waraabowga iyo jadeecada (la eegaayo haddii uu jirkaaga difaac u qabo jadeecada) waxaa dhammaan lagu ogaan karaa hal tijaabo dhiig.

Information for Women

© Public Health Wales

Waxaad xulan kartaa nooca baritaanka aad samayn karto. Waxaa loo baahan yahay in yar oo dhiig ah oo kaliya.

Baaritaanyada dhiigga waxaa caadi ahaan la sameeya waqtiga horey ee uurka.

Waa maxay sababta aan u baahan ahay in lay baaro?

Markii aad ogolaato tijaabada baarista HIV, cagaarshowga nooca B iyo waraabowga waxaad go'aansaneysaa inaad ogaato haddii aad qabtid cudurka si wax kastoo suurtogal ah loo sameeyo si looga ilaaliyo ilmahaaga aan weli dhalan.

Halkee lagu sameyn doonaa tijaabada dhiigga?

Umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto meesha aad ka samayn karto baaritaanka.

Miyuu tijaabada baarista halisyo leeyahay?

Tijaabada baarista waa tijaabo dhiig. Halista kaliya ee ka imaan karo waa midda markii dhiig la iska qaado.

Maxaa dhacaayo haddii aan diido in layga baaro HIV, cagaarshowga nooca B ama waraabowga?

Haddii aad go'aansato in lagaa baarin HIV, cagaarshowga nooca B ama waraabowga umulisadaada ayaa ku weydiin doonto sababta aad u diidey, kadibna waxay kuu macneyn doontaa sababaha ay baaritaanyada muhiim u yihiin. Waqti ka dib markii uurkaaga sii socdo, umulisadaada waxay dib kuu weydiin doontaa haddii aad rabtid in tijaabada baarista lagugu sameeyo.

Waxaad xittaa weydiin kartaa in lagaa baaro HIV, cagaarshowga nooca B ama waraabowga waqti walba ee uurkaaga.

Sidee uu heli doonaa natiijada tijaabada baarista?

Umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto goobta iyo sida aad natiijoyinka baaritaanyada u heli doonto.

Natiijadeyda baaritaanka miyuu ahaan doonaa mid qarsoodi (sir) ah?

NHS'ta waxay natiijoyinka dhammaan baaritaanyada ku hayaan si qarsoodi ah. Siyaasadda isbitaalka ee ku saabsan inta qofood ee arki karo natiijoyinka baaritaanyadaada wuu kala duwan yahay. Umulisadaada ayaa kuu macneyn doonto hab-socodyada deegaankaaga.

Information for Women
© Public Health Wales

Fayruska dhammeeya unugyada difaaca jirka (HIV)

Waa maxay HIV?

HIV waa fayrus dhammeeyaa unugyada difaaca jirka. Waa fayruska sababi karaa cudurka Aydiska. Qof qaba HIV wuxuu sanado badan u ekaan karaa inuu caafimaad-qab yahay. Ma ogaan karaan inay cudurka qabaan aysan ka eheen markii lagu sameeyo tijaabo dhiig. Hase-yeeshee, cudurkaan waxaa loo gudbin karaa ilmahaada intii ay uurka ku jiraan, markii ay dhalanaayaan ama markii aad naas-nuujineyso.

Sidee loo qaada HIV?

HIV waxaa la qaadi karaa markii:

- hooyo cudurka qabtaa ilmaheeda ugu gudbiso intuu uurka ku jiro, markii ay dhalayso ama naas-nuujineyso;
- galmo **walba** lala sameeyo qof cudurka qaba haddii salbatiibo la isticmaalin;
- lagugu shubo dhiig ama badeeco dhiig ka sameysan ee ku jiro fayruska (dalka Ingiriiska cuduradaan waa laga baara dhiiggaa laakin dhammaan dalalka kale lagama baaro);
- cirbado iyo qalabyada duritaanka qof kale ee cudurka qaba lala qaybsado; iyo
- xirir lala yeesho cirbado aan nadiif eheyn ee loo isticmaaley duridda iyo sawirka jirka.

Waa maxay faa'iidoyinka sameynta tijaabada baarista HIV markii uur la qabo?

Haddii aad tahay HIV boositif iyo aadan ogeyn, waxaa jiro fursad sare (25%, ama 4tiiba 1 fursad) in ilmahaada noqon doonaan HIV boositif.

Haddii la ogaado inaad qabtid HIV, waxaa la qaban karaa dhowr waxyaabood si loo yareeyo fursada inaad cudurka u gudbiso ilmahaada. Waxaa lagu siin doonaa daaweyn takhasuusan iyo xannaano. Haddii aad ogolaato daaweynta lagu siiyo, halista ilmahaada wuxuu noqon doonaa 1% ama ka yar (100kiiba 1 fursad ama ka yar inaad u gudbiso cudurka). Daaweynta wuxuu xittaa kugu hayn doonaa si caafimad-qab ah.

Waa maxay faa'iido-darrada samaynta tijaabada baarista HIV markii uur la qabo?

Ma jiro waqti fiican ee lagu ogaado inaad tahay HIV bositif. Hase-yeeshee, haddii aad ogaato markii aad uur leedahay, waxaa lagu siin karaa daaweyn si loo joojiyo inaad ilmahaada fayruska u gudbiso.

Information for Women

© Public Health Wales

Miyaan sameeyaa tijaabada baarista HIV?

Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari karo haddii aad rabtid in lagu baaro iyo inkale. Dhammaan isbitaalada ku yaalo gobolka Wales ayaa dhammaan haweenada siiyo tijaabada baarista HIV sababtoo ah waxaa suurtogal ah in la yareeyo fursada in ilmaha qaado fayruska.

Muxuu ii sheegi doonaa natiijada tijaabada baarista?

Tijaabada baarista HIV wuxuu cabbiraa unugyada difaaca jirka ee ku jiro dhiiggaaga.

Natiijada baaritaanka ayaa kuu sheegi doono haddii aad qabtid cudurka HIV. Haddii baaritaanka muujiyo inaadan qabin cudurka, waa muhiim inaad xasuusato inaad HIV qaadi karto markii aad uur leedahay. Haddii tusaale ahaan aad lammaanahaada beddesho intii aad uur leedahay, waa inaad salbatiibo isticmaashaa.

Haddii aad qaadey cudurka HIV dhowr toddobaadyo ka hor maalinta dhiigga lagaa qaadey, waxaa suurtogal ah in jirkaaga weli uusan bilaabin inuu soo saaro unugyada difaaca jirka, baaritaankana laguma awoodi karo in lagu ogaado cadurka.

Haddii, markii aad uur qabtid aad beddesho lammaanahaada ama ka wel-welsan tahay inaad qaadey HIV, cagaarshowga nooca B, waraabowga ama cuduro kale ee dadka isku gudbiyaan, waxaad umulisadaada ka codsan kartaa inay baaritaan kale kugu sameyso waqti walba ee aad uurka qabtid. Waxaad xittaa baaritaan sir ah ka sameysan kartaa kiliinikada caafimaadka galmada ee kuu dhow. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa: www.publichealthwales.org

Waa maxay tijaaboyinka cudur-aqoonsiga HIV?

Tijaabada baarista HIV aad ayuu sax u yahay. Haddii tijaabada baarista lagu ogaado inaad qabtid HIV, waxaa lagugu samayn doonaa tijaaboyin dhiig ee kale si takhtarkaaga u qorsheeyo daaweyntaada.

Samaynta tijaabada baarista HIV miyuu wax-yeeleyn ku lahaan karaa caymiskeyga?

Shirkadaha caymiska dadka ma weydiin karaan haddii u sameeyey baarista HIV. Waxay ku weydiin karaan oo kaliya haddii aad cudurka qabtid. Caymiska nolosha wax-yeelayn kuma yeelan doono baaritaanka HIV, xittaa haddii natiijada sheego inaad cudurka qabtid, marba haddii aadan faah-faahin muhiim ah ka qabin taariikhda aad caymiskaas sameysatey.

Macluumaadkaan waxaa laga soo koobey xeer-deganaha Ururka Takhatiirta Ingiriiska iyo Ururka Shirkadaha Caymiska Ingiriiska.
Luulyo 2008.
Bogga internet: http://www.bma.org.uk/images/MedicalInfoInsurance_tcm41-173470.pdf

Information for Women
© Public Health Wales

Maxaa dhacaayo haddii aan qabo HIV?

Haddii uu baaritaanka muujiso inaad qabtid HIV, waxaad awoodi kartaa inaad umulisadaada ama takhtarkaaga la qorsheyso wixii xiga ee dhici doono. Waxaa lagu siin doonaa xannaano takhasuusan iyo daaweyn si lagugu caawiyo cudurka. Kani wuxuu kugu caawin doonaa yareynta halista in ilmahaada qaado fayruska. Waxaa lagu siin doonaa daawo. Waxaa xittaa lagugu talin doonaa in ilmahaada ku dhasho habka qalliinka iyo inaadan naas-nuujinin. Daaweyntaan kuma bogsoonaan doontid laakin wuxuu wanaajin doonaa caafimaadkaaga.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan HIV ka heli kartaa:

- umulisadaada, takhtarka isbitaalka ama GP'gaaga; ama
- kiliinikada caafimaadka galmada ee kuu dhow - waxaad wici kartaa isbitaalkaaga xaafada iyo weydiin kartaa meesha uu ku yaalo kiliinikada GUM ee caafimaadka galmada.

Cagaarshowga nooca B

Waa maxay cagaarshowga nooca B?

Cagaarshowga nooca B waa fayrus ee beerka wax-yeeleeyo. Dad badan ee cagaarshow nooca B qabo, ma oga inay qabaan. Dadka wayn badankooda ee qabo cagaarshowga nooca B si buuxa ay uga reystaan, laakin tiro yar waxay noqdaan 'sidayaasha' fayruska. Dadka sideyaasha ah waxaa ku dhici karo cudur beer aad u xun.

Haddii haween uur leh ay qabto cagaarshowga nooca B, ilmaheeda ayaa qaadi karo fayruska cagaarshowga nooca B markii ay dhalanayaan. Ilmaha noloshooda oo dhan ayuu fayruska hayn karaa waxayna halis ku jiraan inay qaadaan cudurka beerka.

Sidee loo qaada cagaarshowga nooca B?

Cagaarshowga nooca B waxaa la iska qaadaa markii:

- hooyo cudurka qabtaa ilmaheeda u gudbiso markii ay dhalayso;
- galmo lala yeesho qof cudurka qaba haddii salbatiibo la isticmaalin;
- xiriir lala yeesho dareraha jirka ee qof cudurka qabo;
- xirir lala yeesho cirbado aan nadiif eheyn ee loo isticmaaley duridda iyo sawirka jirka;
- la qaybsato cirbado cudur leh iyo qalabyada duritaanka qof cudurka qaba;
- dhiig lagugu shubo ama qalliin lagugu sameeyo dibedda dalka Ingiriska; iyo
- waqti dheer si soke lala nolaato qof cudurka qaba.

Information for Women
© Public Health Wales

Waa maxay faa'iidoyinka samaynta tijaabada baarista cagaarshowga nooca B markii uur la qabo?

Baaritaanka cagaarshowga nooca B waa muhiim sababtoo ah haddii takhaatiirta ay ogaadaan inaad cudurka qabtid ka hor intii uu ilmaha dhalanin, tallaalo ayaa lagu sameyn karaa cunugga markuu dhasho si looga ilaaliyo inuu qaado fayruska. Tallaalka wuxuu ilmaha badankooda ka ilaaliyaa inay qaadaan cagaarshowga nooca B.

Haddii aad qabtid cagaarshowga nooca B, waxaa jiro fursad aad u wayn in ilmahaada ku dhaco (ilaa 70% ama 100kiiba 70). Haddii lagu baaro iyo lagaa helo cagaarshowga nooca B, ilmahaada waa la tallaali karaa, fursada in ilmahaaga qaado cudurka wuxuu ka yar yahay 5% (kaasi waa, 100kiiba 5).

Waa maxay faa'iido-darrada samaynta baarista cagaarshowga nooca B markii uur la qabo?

Ma jiro waqti fiican ee lagu ogaado inaad qabtid cagaarshowga nooca B. Hase-yeeshe, haddii aad ogaato markii aad uur ledahay, ilmahaada waa la tallaali karaa si looga caawiyo inuu fayruska ku dhacin.

Miyaan sameeya tijaabo baarista cagaarshowga nooca B?

Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari karto in lagu baaro iyo in kale. Dhammaan isbitaalada ku yaalo gobolka Wales waxay baxshaan tijaaboyinka baarista cagaarshowga nooca B sababtoo ah ilmaha waa laga tallaali karaa si loo joojiyo inay adiga kaa qaadaan fayruska.

Muxuu ii sheegi doonaa tijaabada baarista?

Tijaabada baarista cagaarshowga nooca B wuxu dhiiggaaga ka eega fayruska cagaarshowga nooca B.

Natiijada baaritaanka wuxuu kuu sheegi doonaa haddii aad qabtid cagaarshowga nooca B. Haddii uu natiijada muujiyo inaadan qabin cudurka, waa muhiim in la xasuusto inaad qaadi kartid cagaarshowga nooca B markii aad uur leedahay. Haddii aad beddesho lammaanahaada intii aad uurka leedahay, waa inaad isticmaasha salbatiibo.

Haddii aad qaado cagaarshowga nooca B dhowr bilood ka hor maalinta dhiigga lagaa qaado, baaritaanka laguma ogaan karo inaad cudurka qabtid.

Haddii, intii aad uur leedahay beddesho lammaanahaada ama ka wel-welsan tahay inaad qaadey HIV, cagaarshowga nooca B, waraabowga ama cuduro kale ee dadka isku gudbiyaan, waxaad umulisadaada ka codsan kartaa inay baaritaan kale kugu sameyso waqti walba ee urkaaga. Waxaad xittaa baaritaan sir ah ka sameysan kartaa kiliinikada caafimaadka galmada ee kuu dhow. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa: www.publichealthwales.org

Information for Women

© Public Health Wales

Waa maxay tijaaboyinka cudur-aqoonsiga cagaarshowga nooca B?

Tijaabada baarista cagaarshowga nooca B waa mid aad sax u ah. Haddii tijaabada baarista muujiyo inaad qabtid cagaarshowga nooca B, waxaad u baahan kartaa tijaaboyin dhiig ee kale sidii takhtarka u qorsheeyo tallaalada uu ilmaha u baahan doono.

Maxaa dhacaayo haddii aan qabo cagaarshowga nooca B?

Haddii aad qabtid cagaarshowga nooca B, umulisadaada ama takhtarkaaga ayaa kagala hadli doonto sida uu cudurkaas saamayn kugu yeelan doono.

Waxaad xittaa ka wel-weli kartaa in dad kale ee qoyskaaga ka mid ah qabaan cudurka. Ayagaba waa la baari karaa iyo waa la tallali karaa haddii loo baahdo.

Waraabowga

Waa maxay waraabowga?

Waraabowga waa cudur bakteeriyo sababa ee aad u xun. Dadka badankooda ee qabo waraabowga waqti gaaban ayeey xannuunsadaan markii koowaad, waxaana suurtogal ah inaysan ogeen inay cudurka qabaan. Laakiin haddii waraabowga la daaweynin, wuxuu dhibaato xun keeni karaa waqti dambe ee nolosha, ay ku jiraan dhaawaca maskaxda iyo dhibaato wadne.

Sidee loo qaada waraabowga?

Waraabowga waxaa la iska qaadaa markii:

- hooyo cudurka qabtaa ilmaheeda u gudbiso markii ay uur leedahay; ama
- galmo lala yeesho qof cudurka qaba ayadoo salbatiibo la isticmaalin;

Waa maxay faa'iidoyinka samaynta tijaabada baarista waraabowga markii uur la qabo?

Markii daawada antibiyotiko lagu siiyo waqtiga horey ee uurka ayaa ku caawin doono iyo wuxuu caadi ahaan ka hortagi doonaa in ilmahaada qaado waraabowga. Mar-mar, ilmaha yar ayaa ayagaba uu baahan doono antibiyotiko markii ay dhashaan. Haddii aad qabtid waraabowga markii aad uur leedahay, wuxuu sababi karaa dhicis ama wuxuu dhaawac gaarsiin karaa ilmahaada.

Waa maxay faa'iido-darrada samaynta tijaabada baarista waraabowga markii uur la qabo?

Ma jiro waqti fiican ee lagu ogaado in la qabo waraabow. Hase-yeeshe, haddii aad ogaato markii aad uur leedahay, waa lagu daaweyn karaa si looga hortago in ilmahaada ku dhaco dhibaatooyin wayn.

Information for Women
© Public Health Wales

Miyaan sameeya tijaabada baarista waraabowga?

Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari karto haddii aad rabtid baaritaanka iyo in kale. Dhammaan isbitaalada ku yaalo gobolka Wales waxay haweenada uurka leh siiyaan tijaabada baarista waraabowga sababtoo ah daawada antibiyotiko ayaa ka hortagi karo in ilmahaada dhibaato wayn ku dhaco.

Muxuu ii sheegi doonaa tijaabada baarista?

Tijaabada baarista waraabowga wuxuu cabiraa unugyada difaaca jirka ee ku jiro dhiiggaaga.

Natiijada baaritaanka wuxuu kuu sheegi doonaa haddii aad qabtid cudurka waraabowga. Haddii natiijada muujiyo in aadan qabin cudurka, waa muhiim inaad xasuusato inaad waraabowga qaadi karto markii aad uur leedahay. Haddii aad lammaanahaada beddesho intii aad uur leedahay, waa inaad isticmaasha salbatiibo.

Haddii aad waraabowga qaadey dhowr toddobaadyo ka hor tijaabada dhiigga, waxaa suurtogal ah in jirkaaga uusan bilaabin inuu soo saaro unugyada difaaca jirka iyo baaritaanka lagu ogaanin cudurka.

Haddii, intii aad uur leedahay beddesho lammaanahaada ama ka wel-welsan tahay inaad qaadey HIV, cagaarshowga nooca B, waraabowga ama cuduro kale ee dadka isku gudbiyaan, waxaad umulisadaada ka codsan kartaa inay baaritaan kale kugu sameyso waqti walba ee urkaaga. Waxaad xittaa baaritaan sir ah ka sameysan kartaa kiliinikada caafimaadka galmada ee kuu dhow. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa: www.publichealthwales.org

Waa maxay tijaaboyinka cudur-aqoonsiga waraabowga?

Natiijoyinka tijaaboyinka baarista ee waraabowga mar walba si fudud looma garan karo. Marmar natiijada tijaabada baarista wuxuu sheegi karaa inaad cudurka qabtid sababtoo ah horey ayuu waraabow kugu dhacey iyo lagaa daaweeyey, ama aad qabtid dhibaato ka duwan iyo ka dhib yar. Haddii tijaabada baarista lagaa helo cudurka, waxaa ballan lagugu sameyn doonaa takhtar ku takhasuusan cudurada noocan ah. Takhtarkaan wuxuu ku weydiin doonaa su'aalo, ay ku jiraan su'aalo ku saabsan cuduro horey kugu dhacey, si cudur-aqoonsi loo sameeyo iyo go'aan laga gaaro daaweynta ugu fiican.

Maxaa dhacaayo haddii aan qabo waraabowga?

Haddii aad qabtid waraabowga, umulisadaada ama takhtarkaaga ayaa kula hadli doono kuuna sheegi doono sida uu kuu saamayn doono. Waxaa lagu siin doonaa antibiyotiko iyo waxaad u baahan kartaa baaritaanyo dheeraad ah.

Information for Women

© Public Health Wales

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad macluumaad dheeraad ee ku saabsan waraabowga ka heli kartaa:

- umulisadaada, takhtarkaaga isbitaalka ama GP'gaaga; ama
- kilinikada caafimaadka galmada NHS ee kuu dhow - waxaad wici kartaa isbitaalkaaga xaafada iyo weydiin kartaa meesha uu ku yaalo kilinikada GUM ee caafimaadka galmada.

Jadeecada

Tijaabada baarista lagu eego haddii aad difaac ku qabtid jadeecada ma badbaadin doono ilmaha uurkaan ku jiro.

Haddii aadan difaac u qabin jadeecada, waxaa lagu siin doonaa tallaalo uurka ka dib. Kani wuxuu ilaalin doonaa uur kale ee aad mustaqbalka qaado inaysan saamayn ku yeelan jadeecada.

Waa maxay jadeecada?

Jadeecada waa cudur caadi ahaan ilmaha ku dhaco. Waa cudur fayrus sababa ee si fudud qof ka qof ku faafa. Caadi ahaan waa jirro khafiif ah. Qof jadeeco qaba waxaa ka soo baxo firiiricyo iyo qiyaas ahaan hal toddobaad ayeey xannuunsadaan.

Hase-yeeshee, haddii jadeecada kugu dhaco 12ka toddobaad ee ugu horeeyo uurkaaga, wuxuu dhaawac aad u xun gaarsiin karaa maskaxda, wadnaha, indhaha iyo dhegaha ilmahaada. Kani waxaa lagu magacaaba jadeecada dhalashada laga qaado.

Sidee loo qaadaa jadeecada?

Jadeecada waxaa la qaadi karaa markii:

- xiriir toos ah lala lahaado dareeraha dhuunta ama sanka ee qof cudurka qaba; iyo,
- la neefsato dhibicyada hawada lagu shubo markuu qof cudurka qabo hindhiso, kufaco ama hadlo.

Waa maxay faa'iidoyinka samaynta tijaabada baarista difaac u lahaanta jadeecada markii uur la qabo?

Haddii aad difaac ka qabin jadeecada, waxaa lagu siin doonaa labo tallaalo ee lagu magacaabo MMR kadib markii uurka dhammaado. Waa inaad xasuusataa in tijaabada baarista loogu talagalay oo kaliya in lagu ogaado haddii aad difaac ka qabtid jadeecada. Tijaabada baarista laguma baaro haddii aad qabtid jadeeco mana muujin karo haddii ilmaha qabo jadeeco. Waa in lagu siinin tallaalka markii aad uur leedahay.

Information for Women
© Public Health Wales

Miyaan sameeya tijaabada baarista si aan u eego haddii aan difaac ka qabo jadeecada?

Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari kartid haddii aad rabtid baaritaan iyo in kale. Dhammaan isbitaalada ku yaalo gobolka Wales ayaa dhammaan haweenada uurka leh siiyo tijaaboyinka baarista si loo eego haddii ay difaac ka qabaan jadeecada.

Xittaa haddii lagugu sameeyey tallaalka jadeecada waqti horey, weli waa muhiim in baaritaanka dhiigga lagugu sameeyo iminka aad uur leedahay. Qiyaas ahaan 5% (kaasi waa 10kiiba 5) ee dadka la tallaaley difaac uma qabaan jadeecada.

Waa maxay tijaaboyinka cudur-aqoonsiga ee lagu eego hadii difaac ka qabtid jadeecada?

Tijaabada baarista inaad difaac ka qabtid jadeecada aad ayuu sax u yahay, caadi ahaan uma baahnaan doontid in baaritaanyo kale lagugu sameeyo.

Maxaa dhacaayo haddii aan difaac ka qabin jadeecada?

Haddii baaritaankaaga muujiyo inaadan iska difaaci karin jadeecada, waxa lagu siin doonaa labo tallaal MMR ee ku difaaci doono uurarka mustaqbalka. Tallaalka koowaad waa in la sameeya dhammaadka uurkaan, tallaalka labaadna afar toddobaad ka dib.

Macluumaad muhiim ah

Haddii firiiric kaa soo baaxo ama xiriir la yeelato qof firiiric qabo markii aad uur leedahay, u sheeg umulisadaada ama takhtarkaaga. Waxaad u baahan kartaa inaad sameyso tijaaboyin dhiig kale si aad u ogaato inuu kugu dhacey jadeeco ama cudur fayrus kale ee sababo firiiricyada.

© Xuquuqda Daabacadda 2010. Ururka NHS ee Caafimaadka Shacbiga Wales. Dhammaan xuquuqyada u xiran. Lama ogola in gebi ahaan ama qayb ahaan nuqul laga sameysto ayadoo fasax laga helin milkiilaha xuquuqda daabacadda.
www.antenatalscreening.org
Abriil 2010
IP Daabacadda 9aad

Information for Women

© Public Health Wales